# Seattle Fire Department

Tignoolajiyada Hawada ee Ka Jawaabista Gurmadka Degdegga ah

## Waa maxay tignoolajiyadani?

Seattle Fire Department waxay soo jeedinaysaa in tiro kooban oo ah Tiknoolajiyada Hawada ee Jawaabta Degdegga ah (Emergency Response Aerial Technology, ERAT), ama diyaaradaha aan duuliyaha lahayn, lagu daro agabkeeda gaarka ah ee dab-damiska, samatabbixinta, iyo ka jawaabista xaaladaha caafimaad ee degdegga ah. Aagga la filayo inuu daboolo ERAT wuxuu gaari doonaa dhammaan magaalada.

SFD ERAT waxaa lagu kaydin doonaa saqafka xarun dab-damis oo Waaxda Dab-damiska Seattle (Seattle Fire Department, SFD) ah, waxaana maamuli doona oo hawlgelin doona Fire Alarm Center.

Marka la hawlgeliyo, ERAT wuxuu u duuli doonaa goob leh lool iyo dhirir cayiman, iyadoo kamaraddu u jeeddo jiinka cirka. Marka uu goobta gaaro, kamaradda waxaa loo jeedin doonaa dhanka hoose si ay u bixiso muuqaal toos ah oo ay daawan karaan taliyeyaasha dhacdooyinka iyo shaqaalaha dirista ee Seattle Fire ee tababaran, si ay uga caawiso go'aannada hawlgalka. Muuqaalka tooska ah sinaba looma duubi doono mana la keydin doono. Qof aan ka tirsanayn shaqaalaha gurmadka ee SFD looma oggolaan doono inuu daawado muuqaalka tooska ah ee diyaaradda aan duuliyaha lahayn. SFD uma adeegsan doonto muuqaalka diyaaradda aan duuliyaha lahayn ujeeddooyin fulinta sharciga. Looma xiriirin doono wax qalab kormeer ama dabagal ah (surveillance tools).

## Maxaan u adeegsaneynaa tignoolajiyadan?

ERAT waa qalab casri ah oo muhiim u ah hay'adaha dab-damiska si ay u badbaadiyaan nafaha una ilaaliyaan hantida. SFD waxay qiimeynaysay sida ERAT u wanaajin karo jawaabaha xaaladaha degdegga ah iyo natiijooyinka bulshada.

Meelaha qaarkood, ERAT ayaa laga yaabaa inuu goobta dhacdada gaaro marka hore, isagoo siinaya SFD xog muhiim ah oo lagu hago xeeladaha dab-damiska ama samatabbixinta. Waxa kale oo uu kordhin karaa badbaadada dab-demiyeyaasha, Farsamoyaqaannada Caafimaadka Degdegga ah (Emergency Medical Technicians, EMTs), iyo dadka ku sugan ama u dhow goobta dhacdada. Haddii ay dhacdo masiibo weyn, wuxuu baari karaa kaabayaasha muhiimka ah sida buundooyinka, isbitaallada iyo dugsiyada. Wuxuu hubin karaa in waddooyinka gurmadku ay ammaan u yihiin shaqaalaha gurmadka ee SFD.

SFD waxay aqoonsatay noocyo dhowr ah oo dhacdooyin ah halkaas oo aragti hawada laga helo ay kor u qaadi karto awooddeeda isla markaana ay badbaado dheeraad ah siin karto shaqaalaha gurmadka iyo dadweynaha. Tusaalooyinka xaaladaha loo adeegsan doono ERAT waxaa ka mid ah: dababka ka kaca dhismayaasha iyo dabaqyada dhaadheer, samatabbixinta biyaha, dababka dhirta

iyo cawska, xaaladaha walxaha halista ah iyo tamarta la xiriira, iyo gurmadka ka dambeeya dhulgariirrada.

## Ururinta

Muuqaalka tooska ah ee hawada laga duubay lama keydin doono mana la hayn doono. Muuqaalka tooska ah lama wadaagi doono mana daawan doonaan cid ka tirsan waaxo kale, hay'ado kale ama dadweynaha.

Xogta aan filayno in adeeg-bixiyaha ERAT ururiyo oo ku kaydiyo adeegaha ammaan ah waxaa ka mid ah cabbirrada la xiriira duulimaadka iyo diyaaradda, sida tirada duullimaadyada, saacadaha ay shaqeysay, masaafada ay martay iyo xaaladda dayactirka. Qandaraasku wuxuu raaci doonaa shuruudaha Tiknoolajiyada Macluumaadka (Information Technology, IT) magaalada, isagoo waajib ka dhigaya sirgelinta xogta iyo ilaalin looga hortagayo gelitaan ama isticmaal aan la oggolayn, marka laga reebo ujeeddooyinka xallinta cilladaha farsamo.

## Ilaalinta

Shaqaalaha maamula ama dira ERAT ee SFD waxay yeelan doonaan shahaadada Maamulka Duulista Federaalka (Federal Aviation Administration, FAA) waxayna raaci doonaan dhammaan tababarrada iyo shuruudaha. Shaqaalaha dab-damiska ee SFD waxay heli doonaan tababar ku saabsan asturnaanta waxayna raaci doonaan siyaasadaha iyo habraacyada looga hortagayo in muuqaalka tooska ah ay daawadaan cid aan ka tirsanayn kooxda taliska dhacdada iyo shaqaalaha dirista ee SFD. Adeeg-bixiyaha waxaa qandaraas ahaan laga mamnuuci doonaa inuu daawado muuqaalka tooska ah marka laga reebo xallinta cilladaha farsamada, sidoo kalena waxaa laga mamnuuci doonaa inuu xogtan la wadaago cid kasta oo ka baxsan SFD. Muuqaalka ERAT looma adeegsan doono in lagu aqoonsado shakhsiyaad; ujeeddadiisu waa oo keliya inuu siiyo taliska dhacdada ee SFD xog ay ugu hagaan dab-damiska, samatabbixinta farsamada iyo hawlgallada gurmadka, qiimeynta burburka dhismayaasha, ama gaarsiinta qalabka badbaadinta nolosha.

## Muddada Faallooyinka

Muddada faallooyinka waa Luulyo 13 ilaa Agoosto 12, 2026. SFD waxay qaban doontaa laba kulan oo fool-ka-fool ah iyo laba kulan oo onlayn ah si looga jawaabo su'aalaha inta lagu jiro muddada faallooyinka.

Waxaad faallooyinkaaga ku gudbin kartaa Seattle.gov/Surveillance. Dhammaan faallooyinka waxaa lagu dari doonaa Warbixinta Saamaynta Kormeerka (Surveillance Impact Report) ee ku saabsan tiknoolajiyaddan waxaana loo gudbin doonaa Seattle City Council. Haddii aad rabto inaad gudbiso aragti ama faallo ka baxsan muddada faallooyinka ee furan, fadlan si toos ah ugu dir Golaha Magaalada Seattle adigoo adeegsanaya cinwaannada iimaylka ee ku yaal seattle.gov/council.